



FREDRIKSTAD
KOMMUNE

Hagista-Waalidiinta



Waalidiintu waa inay go'aan ka gaaraan su'iaalo badan inta uu il-muhu korinaayo. Kordhinta aqoonta iyo tageerada dadka kale ayaa markaa noqon karto caawin iyo faa'iido wanagsan. Baarnaamijka hagista waalidka ayaa fudueeua taas!

Carruurto waxay u baahan yihiin waalid ammaan ah, ay fahmaan oo taageera:

- **Waalidiin ammaan ah** ayaa ilmaha kula kulma gacmo furan. Waxay u dulqaataan shucuurta kala duwan ee ilmaha waxayana ka fekeraan sida iyaga laftoodu uu carruurnimo u soo maray.
- **Waliidin cad oo la fahmi karo** ayaa hoggaanka qabta oo tusa wadada. Waxay sameeyaan xuduudo si daryeel leh, waxayna ogaadan in go'aannadu noqon karaan kuwa aan la jeclayn oo isla markina ah kuwa wanaagsan.
- **Waalidiinta taageera** waxay isku dayan inay fahmaan waayaha iyo dareenka ilmaha, waxayna siiyaan raaxo iyo dhiirigelin labadaba. Waxay u oggolaadaan carruurta inay isku tijaabiyaan oo caawiyaan marka loo baahdo.

Waalidiintu waxay la kulmi doonaan barnaamijka hagista waalidka, laga bilaabo xarunta caafimaadka ilaa fasalka 10aad. Laga bilaabo 2022, barnaamijka waxa lagu soo rogi doonaa dhowr shirkadood.

Barnaamijka hagista waalidiinta ee xarunta caafimaadka:

La-socod ee xarunta caafimaadka oo waalidiinta uurka leh iyo kuwa cusub ayaa lagu casuumi doona wada-tashiyada shaqsiyeed iyo dalabyada koox ahaan oo kala duwan. Hagista waalidiinta ayaa si gaar ah loogu talagay koox ahaan lo hirgeliyo, halkas oo shaqaaluhu ay waalidku la wadaagan aqoonta hadda jirta ayna u furmaan wada sheekaysiga iyo milicsiga waalidka.

Barnaamijka hagista waalidiinta ee xanaanada iyo iskuulka

Hal ama dhowr kulan oo waalidka ah sanadkii, ayaay barnaamijka hagista waalidiinta ku qaban doonaa xanaanada iyo ilaa dugsiga hoose. Waalidintuu waxay heli doonaan bandhig koobaan oo ku saabsan mowduuca hadda jira (tusaale hurdada, waqtiga shashadaha ama horumarka guud). Waxa ku xiga wada sheekaysiga iyo milicsiga waalidiinta. Xannaanooyin badan oo gaar loo leeyahay ayaa iyaguna ku jira barnaaminkan.